

Naga caawi kor  
u qaadista

Mashruuca  
Xasuusta  
Grenfell



## **Waa maxay Mashruuca Xasuusta Grenfell?**

Mashruuca Xasuustu waa taxanayaasha hindisiyaal si guud loogu maamuusaayo laguna xusaayo nolosha dadkii ku dhintay masiibadii Grenfell Tower laguna abuuraayo dhaxal reeb waara.

Ayadoo qayb ka ah Heshiiska Magdhowga ee Madaniga ah oo dhacay Maarsa 2023, Waaxda Dab Damiska ee London (London Fire Brigade, LFB) ayaa balan qaaday £8.25 milyan si ay u abuurto Mashruuca Xasuusta oo lagu maamuusaayo dadkii ku dhintay laguna abuuraayo dhaxal reeb waara.

Hadda, waxaan muhiimad siinaynaa fikirkaaga si aan arrintaan horey ugu dhaqaqno.

## **Waaxda Dab Damiska ee London ayaa doonaysa inay kula shaqeyso**

Waxaan si wayn nooga go'an inaan la shaqeyno xubnaha qoyska ee u dhaw\* ee dadkii ku dhintay masiibadii Grenfell Tower, dadkii ka badbaaday, iyo dhammaan bulshada Grenfell.

Waxaan dooneynaa fikradhiina iyo ra'yigiina si loo xaqijiyo in la waafajiyo himilooyinka iyo muhiimada ehelka dadka dhintay, dadka ka badbaaday iyo bulshada Grenfell.

\* **Xubnaha qoyska ee u dhow** dadka dhintay waxaa laga wadaa qaraabada soo socota ee dadka ku dhintay masiibadii Grenfell Tower – lamaanaha ama xaaska; waalidiinta; carruurta; ilmaha la dhashay; awooweyaasha/ayeyoooyinka; carruurta awoowaha/ayeyada loo yahay; ilmaha carruurta walaalaha; qaraabada qoysku magacaabay.

## **Sida aad uga qeybqaadan karto**

Naqshadda wadaaga ah ee Mashruuca Xasuusta Grenfell ee lagu bixiyo dookhyada soo socda:

**1**

### **Mudeysso kulanka tallo gaar ah**

La mudeysso kulanka tallo bixinta fool ka foolka ah Hogaanka Tallo Bixinta iyo Iskaashiga, Angela Basoah.

limeylka: grenfell.engagement@london-fire.gov.uk

Wac ama fariin u dir: 07385 382 580

**2**

### **Nagula wadaag fikradahaaga oonleenka**

U adeegso foomkeena oonleenka ah si aad fikirkaaga qaab qarsoodi ah oo aad ku qanacsan tahay noola wadaagto:  
[london-fire.gov.uk/memory-project/](http://london-fire.gov.uk/memory-project/)

**3**

### **Faafi Fariinta**

Ku dhiiri geli dadka kale inay door ka qaataan ayna kula wadaagaan fikradahooda.



## Xog badan ka ogoow

Si aad u hesho faahfaahinta buuxda ee Mashruuca Xasuusta Grenfell, iskaanka mare koodhka QR-ka ama booqo: [london-fire.gov.uk/memory-project/](http://london-fire.gov.uk/memory-project/)

## Si wadajir ah, waxaan abuuri karnaa dhaxal reebka macnaha leh.

Waxaad codsan kartaa turjumaadda warqadaan adoo iimayl u diraaya: [grenfell.engagement@london-fire.gov.uk](mailto:grenfell.engagement@london-fire.gov.uk)



LONDON FIRE BRIGADE